# Warbixinta Kooxda Korjoogtada Bulshada Rayidka Kalfadhigii 6aad Ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**15 Febraayo 2025 – 22 Juun 2025**

## Iftiimin Muhiim ah

Warbixintan waxay baareysaa kalfadhigii lixaad ee Golaha Shacabka BJFS, doodaha, hababka go'aan–qaadashada, waxqabadka baarlamaanka, iyo marxaladaha kala duwan ee akhrinta hindise–sharciyeedyada intii lagu guda jiray Kalfadhiga 6aad ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Iyadoo warbixintaan diiradda lagu daaray kaliya muddada **15 Febraayo 2025 ilaa 22 Juun 2025**, warbixintani waxay soo bandhigaysaa kormeer korjoogteyn madaxbannaan oo ka timid bulshada rayidka Soomaaliyeed oo lagu eegay sida sharciyadu u soo gudbeen, wax ka beddelka loo sameeyay, dood looga yeeshay, ugu dambeyntiina loo ansixiyay, iyo sidoo kale caqabadaha iyo waxqabadka xildhibaannada ee saameeyay hab–sami–u–socodka Golaha Shacabka BJFS.

Ujeedada warbixintani waa in lagu xoojiyo **isla xisaabtanka, daahfurnaanta, iyo helitaanka xogta ee bulshada**, iyadoo la kobcinayo xiriirka ka dhexeeya shacabka Soomaaliyeed iyo Baarlamaanka Federaalka. Warbixintu waxay ka tarjumaysaa shaqada kormeerayaasha Kooxda Bulshada Rayidka, iyadoo soo bandhigaysa aragti dhexdhexaad ah oo ku saabsan waxqabadka baarlamaanka iyo hannaanka maamul–wanaagga intii lagu jiray Kalfadhiga 6aad ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Warbixinta Waxa Diyaariyay Kooxda Korjoogtada Bulshada Rayidka ah Kalfadhigii 6aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya BJFS.

## 1. Hordhac

Kalfadhiga lixaad ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa si rasmi ah loo furay **22-kii Febraayo 2025**, taas oo calaamad u noqotay billowga xilli sharciyeed muhiim u ahaa dalka. Furitaanka kulankaas waxa goobjoog ka ahaa madaxda ugu sarreysa labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka, oo ay ka mid ahaayeen **Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane. Aadan Maxamed Nuur (Madoobe)**, **Guddoomiye ku-xigeenka koowaad Sacdiyo Yaasiin Xaaji Samatar**, **Guddoomiyaha Aqalka Sare Mudane. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**, iyo labadiisa ku-xigeen oo kala ahaa Mudane. **Cali Shacbaan Ibraahim** iyo Mudane. **Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde)**, iyo mas'uuliyiin kale oo heer qaran ah. Kulanka furitaanku waxa uu dib u cusbooneysiiyay waajibaadka sharci-dejineed ee labada gole, wuxuuna dejiyay jihadii siyaasadeed ee kalfadhiga lixaad.

Khudbaddii uu jeediyay Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Mudane. Aadan Maxamed Nuur (Madoobe), waxa uu ku soo bandhigay waxyaabihii u qabsoomay Golaha Shacabka intii uu socday kalfadhigii 5aad ee lasoo dhaafay, isaga oo hoosta ka xariiqay hawlaha waaweyn ee horyaallay kalfadhiga 6aad. Waxa uu adkeeyay in dalka ay ka socdeen howlgallo amni oo lagula dagaallamayey kooxaha argagixisada, isaga oo ammaan u jeediyay Ciidanka Xoogga Dalka, ciidamada dowlad-goboleedyada, iyo shacabka Soomaaliyeed ee ka qeyb qaatay dadaallada xoreynta dalka. Waxa kale oo uu xusay safaradii diblomaasiyadeed ee uu ku tegay dalalka Imaaraadka Carabta, Boqortooyada Ingiriiska, iyo dalal kale, kuwaas oo uu ku sheegay in ay xoojiyeen xiriirrada diblomaasiyadeed ee baarlamaannada caalamka. Guddoomiyuhu waxa uu ku dhawaaqay in mudnaanta kalfadhigan ay noqon doonaan: dhammeystirka sharciyadii ka harsanaa kalfadhigii hore, dhammaystirka cutubyada ka dhiman dib-u-eegista Dastuurka, ansixinta shuruucda cusub ee ay soo gudbisay Xukuumaddu, iyo adkaynta la xisaabtanka hay'adaha dowladda.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, **Mudane. Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**, ayaa si rasmi ah u furay kalfadhiga lixaad, isagoo ku raacaya waajibaadka **Qodobka 90-aad ee Dastuurka Kumeel-Gaarka (KMG) ah ee Soomaaliya 2012**, kaas oo u xilsaarayay Madaxweynaha furitaanka kalfadhiyada Baarlamaanka, jeedinta khudbadaha labada gole, iyo saxiixa hindise-sharciyedyada Baarlamaanku ansixiyo sii ay u noqdaan sharci. Khudbaddiisa, Madaxweynaha waxa uu ku bogaadiyay labada gole shaqadii muhiimka ahayd ee ay qabteen kalfadhigii shanaad, isaga oo ku dhiirrigeliyay xildhibaanada in ay labo jibaaraan dadaalkooda ku aaddan meelmarinta hindise-sharciyeedyada dowlad-dhiska iyo xasilloonida siyaasadeed. Waxa uu hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay iskaashiga labada aqal iyo taageerada ay dowladda ka geysan doonto dib-u-habaynta sharciyada.

Kulanka furitaanka waxa sidoo kale ka soo qeyb galay **Ra'iisul Wasaaraha XF Soomaaliya Mudane. Xamza Cabdi Barre**, **Ra'iisul Wasaare ku-xigeennada XFS Mudane. Saalax Jaamac**, **Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Avv. Baashe Yuusuf Axmed, Guddoomiyaha Gobolka Banaadir/Duqa Muqdisho Mudane. Maxamed Axmed Amir**, iyo mas'uuliyiin kale

oo heer qaran ah. Munaasabaddani waxa ay muujisay muhiimadda uu dalku siinayay kalfadhiga lixaad iyo rajadii laga qabay in uu noqdo xilli sharciyeed lagu xalliyo arrimo waaweyn oo dowlad-dhis ah. Hadalladii Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS iyo Madaxweynaha JFS waxay dhigeen saldhig cad oo lagu wajahayo kalfadhiga 6aad mid mudnaanta siinayay amniga qaranka, dhammaystirka Dastuurka cutubyada haray, dib-u-habaynta maamulka iyo hannaanka maaliyadda, iyo xoojinta kormeerka Baarlamaanka ee hay'adaha dowladda.

## 2. Horumarka Sharci-dejinta ee Kalfadhiga 6aad

Kalfadhiga lixaad ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu ahaa mid ay ka dhaceen horumarro sharci-dejin oo muhiim ah, iyadoo Baarlamaanku meel mariyay hindise-sharciyeedyo aad muhiim ah oo saameyn qaran leh. Inta lagu guda jiray mudadan, Golaha Shacabka waxa uu ansixiyay laba hindise-sharciyeed oo aad muhiim u ahaa: **Hindise-Sharciyeedka Barakacayaasha Maxaliga ah (IDPs Bill)** iyo **Hindise-Sharciyeedka Diiwaangelinta Madaniga ah iyo Tirakoobka Dadweynaha (Civil Registration and Vital Statistics Bill)**. Labadan sharci waxa ay dhaafeen akhrintoodii saddexaad, waxaana loo codeeyay si aqlabiyad leh. Meelmarinta shuruucdan waxa ay muujisay sida uu Baarlamaanku u aqoonsaday baahida degdegga ah ee loo qabo in la ilaaliyo xuquuqda barakacayaasha maxaliga iyo in la helo nidaam casri ah oo qaran oo lagu diiwaangaliyo dadka Soomaaliyeed.

Marka laga soo tago shuruucdan la ansixiyay, Golaha Shacabka waxa uu qabtay akhrinta koowaad ee laba heshiis/sharci oo caalami ah: **Axdiga Afrika ee Baraaraha Xuquuqda iyo Daryeelka Caruurta** iyo **Hindise-Sharciyeedka Iskaashiga Caalamiga ah ee Garsoorka (International Judicial Cooperation Bill)**. Doodaha ku saabsanaa labadan hindise-sharciyeed waxa ay muujiyeen aragtiyo is-khilaafsan oo ka dhex jiray xildhibaanada qaarkood waxa ay taageereen in Soomaaliya la jaanqaado heerarka gobolka iyo kuwa caalamiga, halka kuwa kalena ka walaacsanaayeen waafaqsanaanta Dastuurka dalka, qiyamka Islaamka, iyo awoodaha hay'adaha Federaalka. Sababtaas awgeed, labada hindise-sharciyeed waxa loo gudbiyay guddi-hoosaadyada si ay dib u eegis qoto dheer ugu sameeyaan, iyadoo aanay dhaafin akhrintoodii koowaad intii kalfadhiga 6aad socday.

Goluhu waxa kale oo uu qabtay akhrinta koowaad ee **Heshiiskii Aasaaska IGAD (1986)** 12-kii May 2025. Doodaha xildhibaanada ayaa muujiyay aragtiyo kala duwan oo ku saabsan doorka Soomaaliya ee iskaashiga gobolka, kharashaadka xubinnimada, iyo saamaynta siyaasadeed ee IGAD. Xildhibaannada qaarkood waxa ay adkeeyeen muhiimadda wada-shaqaynta gobolka, halka kuwo kalena ku doodeen in dib loo qiimeeyo ka-qaybgalka Soomaaliya ee ururka IGAD. Guddoomiyuhu waxa uu ugu dambayntii heshiiska u gudbiyay Guddiga Arrimaha Dibadda si dib-u-eegis farsamo iyo siyaasadba loo sameeyo, waxaana arrintu ku ekaatay heerkaas inta kalfadhiga lagu jiray.

Intaa waxaa dheer, Golaha Shacabka waxa uu dood ka yeeshay mooshin ku saabsanaa **cabbashooyinka dadweynaha ee la xiriira kordhinta canshuuraha**, taas oo dhalisay su'aalo ku

saabsan hufnaanta, sinnaanta, iyo sida loo fuliyo siyaasadaha cashuuraha ee dalka. Inkastoo mooshinkaasi uusan isu rogin hindise-sharci rasmi ah kalfadhigan, wuxuu muujiyay in Baarlamaanku ka jawaabayay cabashooyinka bulshada oo uu diiradda saarayay arrimaha maamulka maaliyadda. Doodahaas waxay tilmaameen baahida loo qabo isbeddello sharci oo mustaqbalka lagu sameeyo hab-maamulka cashuuraha iyo isla xisaabtanka maaliyadeed ee dowladda.

Guud ahaan, horumarka sharci-dejineed ee kalfadhiga 6aad waxa uu muujiyay awoodda Golaha Shacabka ee horumarinta shuruuc muhiim u ah dalka, iyo isla markaana iftiimiyay meelaha u baahan dib-u-habeyn iyo in la xoojiyo gaar ahaan la-tashiga bulshada rayidka, dib-u-eegista farsamo ee guddiyada, iyo helitaanka xog rasmi ah oo ku saabsan sida shuruucda loo qaabeeyo inta ay socoto geeddi-socodka sharci-dejinta.

# 3. Kormjoogteynta Bulshada Rayidka iyo Ka Qeybgalka Geeddi-socodka Golaha Shacabka BJFS

## 3.1. Korjoogteynta Bulshada Rayidka ee Fadhiyada Golaha Shacabka BJFS

Korjoogteynta bulshada rayidka intii uu socday kalfadhiga 6aad waxa sii weyn u fududeysay hoggaaminta Jilayaasha Aan Dowliga Aheyn Ee Soomaaliyeed ee loo yaqaan afka qalaad **Somalia Non-State Actors (SONSA)** oo kaashanaysay mashruuca **GOLE-KAAB** oo ay wada shaqayn lahaayeen hey'adda **NIMD,** ayna maalgelisay taageerada xafiiska **MIDOWGA YURUB**. **SONSA** waxay fududeysay in bulshada rayidku ka soo qaybgalaan fadhiyada, iyadoo u suurtogelisay aqoonsiyo rasmi ah iyo kuraas gaar ah. Tani waxay sare u qaaday daahfurnaanta waxayna u saamaxday bulshada rayidka inay si dhow ula socdaan doodaha sharci-dejinta, dhaqanka xildhibaanada, iyo marxaladaha kala duwan ee ay shuruucdu soo mareen. CSO-yada waxay joogteeyeen ka qeybgalka fadhiyada muhiimka ah sida doodaha ku saabsanaa Hindise-Sharciyeedka Barakacayaasha Maxaliga ah (IDPs Bill), Hindise-Sharciyeedka Diiwaangelinta Madanig ah, akhrinta koowaad ee Heshiiska IGAD, Axdiga Afrika ee Xuquuqda Caruurta, iyo mooshinka cabashooyinka canshuuraha.

Maadaama ay goob-joog u ahaayeen fadhiyada, Bulshada Rayidk waxa ay awood u yeesheen in ay si toos ah u diiwaangeliyaan sida dooduhu u socdeen, sida xildhibaanadu u xaadireen, iyo sida uu guddoonku u maareeyay nidaamka fadhiyada. Waxay iftiimiyeen dhinacyada wanaagsan sida doodaha wax-ku-oolka ah iyo xilliga go'an ee fadhiyadu ku bilaabmeen iyo sidoo kale dhibaatooyinka muuqda, gaar ahaan buuqa badan, jahawareerka nidaamka, mareenta fadhiyada iyo inta jeer uu Golaha Shacabka kooram la'aan u baaqday. Kormeerka joogtada ahi korjoogteynta bulshada rayidka waxa uu noqday tiir muhiim u ahaa qiimeynta waxqabadka baarlamaanka, korna u qaaday kalsoonida bulshada ee habka sharci-dejinta.

Inkasta oo ay helayeen oggolaansho buuxa oo ay ku galaan hoolka fadhiyada, haddana ka-qaybgalka bulshada rayidka waxa uu ku koobnaa heerka siyaasadeed ee fadhiga, maadaama aanay muuqan qaybaha farsamo ee ugu muhiimsan ee lagu qaabeeyo shuruucda ka hor inta aan loo keenin akhrinta koowaad. Fadhiyadu waxay muujiyeen mowqifyada xildhibaanada iyo natiijada ugu dambeysa, balse ma aysan muujin doodaha qoto dheer, is-afgaradka, iyo wax-ka-beddellada iyo wax ku darid lagu sameeyay hindise-sharciyeedyada badankood. Taasi waxay adkaysay in bulshad rayidku soo saaraan fal-celin waqti ku habboon oo ku saleysan xog badan.

## 3.2. Helitaanka Kulamada Guddiyada iyo Muhiimadda Ka-qaybgalka Bulshada Rayidka

In kasta oo bulshada rayidka loo oggolaaday inay si joogto ah uga qeybgalaan fadhiyada guud Golaha Shacabka, haddana gabi ahaanba waxa aan suurtagelin in kulamada guddiyada baarlamaanka ay ka qeebgalaan bulshada rayidka kuwaas oo ah meesha ugu muhiimsan ee lagu sameeyo falanqaynta Hindise Sharciyeedyada, dib-u-eegista qodob-qodobka ah, iyo la-xisaabtanka hay’adaha dowladda. Guddiyadu waxay ka shaqaynayeen su’aalaha farsamada, codsiga khubarada, iyo diyaarinta warbixinaha lagu hago akhrinta labaad iyo akhrinta saddexaad. Hase yeeshee, kulamadan muhiimka ah uma suurtagelin ineye ka qeeybgalaan bulshada rayidka, iyadoo **hal kulan oo kaliya** ay ka soo muuqdeen, kaas oo ahaa wadatashigii 7 March 2025 ee Guddiga Maaliyadda, Qorshaynta, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Kormeerka Hay’adaha Dowladda. Kulankaasna ma ahayn mid furfurnaan rasmi ah ee guddiga, balse wuxuu ka dhashay cadaadis xooggan oo ka yimid bulshada rayidka, Shirkadaha ganacsiga, culumada, iyo aqoonyahannada oo si wadajir ah uga hor yimid wax-ka-beddellada Hindise-Sharciyeedka Hay’adaha Maaliyadeed (Financial Institution Bill).

Intii uu socday kalfadhiga 6aad, in ka badan **30 kulan oo guddiyadu  Golaha Shacabka yeesheen** ma aysan helin wax daahfurnaan ah. Warbixinnada ay guddiyadu baarlamanka ay bulshada ay la wadaagi jireen waxa ay ahaayeen qoraalo kooban oo lagu faafiyo baraha bulshada sii gaar kaliya bogga Facebook, badanaa oo aan laga bixin faahfaahin ku saabsan waxa laga doodday, go’aannada la gaaray, ama cidda ka qaybqaadatay sida qoraaladda saxda ah waxa afka qalaad lagu sheego (Inputs or Contributions)Tani waxay wiiqday xaqa dastuuriga ah ee helitaanka xogta waxayna ka hor istaagtay bulshada rayidka inay fahmaan sababaha ka dambeeya isbeddellada lagu sameeyo shuruucda sida ineey ogaaday qodobada saxda ah ee la badalay, sababaha loo badalay, curinta iyo aragtiyaha xildhibaanka ay ka timid doodaha wax bedelka iyo wax ku darida dheeriga ah.

Sidoo kale, waxa gebi ahaanba maqnaa la-tashiyada balaaran horudhaca ah ee sharci-dejinta, taas oo badanaa ka bilaabanta hey’adaha xukuumadda ka hor inta aan loo gudbin Baarlamaanka. Maaddaama Bulshada Rayidka, aqoonyahannada, iyo ganacsataduba aysan qayb ka ahayn marxaladdan hore, sii looga fogaado in hindise-sharciyeedyada noqdaan kuwo aan u dhaboolin xaaladda bulshada, dhaqanka, iyo mabaa'diida Islaamka. Haddii hab-raac la’aan lagu diyaariyo

shuruucda, waxa adag inay noqdaan kuwo hirgeliya xalal waara marka uu Madaxweynaha saxiixo kadib doo lagu soo saaro faafinta rasmiga ah.

Bulshada rayidka waxa ay aragtay in helitaanka kulamada guddiyadu uusan ahayn "ikhtiyaar la siiyo" balse uu yahay "xuquuq dastuuri ee la sugaayo" sida uu dhigaayo dastuurka kumeel-gaarka ah qodobkiisa 22-aad[1] waayo waa halka ay ku samaysmaan tayada sharciga, talooyinka khubaradu ku jiraan, iyo halka la sugo isla xisaabtanka hay'adaha dowladda. Ka-qaybgalka bulshada rayidka waxa uu sare u qaadi lahaa hufnaanta sharci-dejinta, waxa uu hodmin lahaa doodaha, waxa uuna xaqiijin lahaa in sharciyada lagu saleeyo duruufaha dhabta ah ee bulshada Soomaaliyeed.

Intii uu socday kalfadhiga 6aad waxa kale oo dhacay buuq badan iyo qalalaaso anshaxeed oo keeni jiray in fadhiyada hakad galaan. Fadhigii 30 April 2025 ee ku saabsanaa cabashooyinka canshuuraha iyo akhrinta labaad ee Xeerka Diiwaangelinta Rayidka, waxa ka dhacay muran iyo qaylo, taas oo keentay in fadhiga si ku-meelgaar ah loo joojiyo. Bulshada rayidka waxa ay diiwaangeliyeen dhacdooyinkan, iyagoo xusay inay dhaawacayaan sumcadda Golaha Shacabka oo ay hoos u dhigayaan kalsoonida shacabka. Guddoonka ayaa ku guuleystay inuu dib u soo celiyo nidaamka, balse waxa caddaatay baahida loo qabo in si joogto ah loo adkeeyo hannaanka Habka Doodda iyo Anshaxa ee sida ku xusay Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka qodobkiisa 28aad[2]

Gebogabadii, kormeerka bulshada rayidka intii uu socday kalfadhiga 6aad waxa uu muujiyay in Golaha Shacabka uu lahaa karti sharci-dejin, balse ay jirto meel badan oo laga hagaajin karo gaar ahaan hufnaanta, anshaxa, soo xaadirista oo la joogteeyo iyo helitaanka ka qeebgalka kulamada guddiyada golaha shacabka BJFS.

## 3.3. Horumarka Muhiimka ah ee Shuruucda La Ansixiyay oo ay ku jiraan Afarta Hindise-Sharciyeed Dib-u-habaynta Dhaqaalaha

Kalfadhiga lixaad ee Golaha Shacabka waxa uu lahaa fadhiyo sharci-dejin oo saameyn ballaaran ku yeeshay hannaanka maamul iyo dib-u-habaynta hay'adaha dowladda. Kuwa ugu muhiimsanaa ee la dajiyay waxaa ka mid ahaa ansixinta **Hindise-Sharciyeedka Barakacayaasha (IDPs Bill)** iyo **Hindise Sharciyeedka Diiwaangelinta Rayidka iyo Tirakoobka Dadweynaha (Civil Registration and Vital Statistics Bill)**. Labadan hindise-sharciyeed waxa ay dhammeystireen akhrintoodii saddexaad, waxaana loo ansixiyay si aqlabiyad leh. Shuruucdan waxa ay wax la rajeynayaa ineey xaliyeen caqabado muddo dheer soo jiitamayay, oo ay ka mid yihiin ilaalinta xuquuqda dadka barakacayaasha ah iyo dhisidda nidaam qaran oo midaysan oo lagu diiwaangeliyo xogta dadka Soomaaliyeed.

[1] Article 22 of the Somali Provisional Constitution 2012 is titled "Right of Political Participation." It guarantees every citizen the right to participate in public affairs and politics.
[2] Qodobka 28aad, faqrada 5(f) XH-GSH-B10 "Xubinta cabiraysa fekerkeeda laguma samayn karo gunuunuc, qaylo, sacabbin, foori iyo wixii kale ee dhaqan xumo ah". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Diseember 31, 2022.

Intaa waxaa dheer, kalfadhigan 6aad waxa lagu dooday in Golaha Shacabku uu ansixiyay **afar Hindise-Sharciyeed oo Dib-u-habeyn Dhaqaale ah**, kuwaas oo laf-dhabar u ahaa dadaallada dalka ee dib-u-habaynta maaliyadda iyo dhisidda kalsoonida hay'adaha dhaqaale. Shuruucdan ayaa qayb weyn ka qaatay casriyeynta nidaamka maaliyadeed, xoojinta maamul wanaagga, iyo ilaalinta dhaqaalaha qaranka.

Afarta Hindise-Sharciyeed ee dib-u-habaynta dhaqaalaha waxay ahaayeen:

1. **Hindise-Sharciyeedka Hay'adaha Maaliyadeed (Financial Institutions Bill)**

Hindise-Sharciyeedkaan waxa uu casriyeeynayaa nidaamka maamul ee hay'adaha maaliyadeed, wuxuuna kordhinayaa awoodaha Bangiga Dhexe si uu si buuxda u kormeero hay'adaha maaliyadeed ee dalka. Waxa uu dhisay nidaam lagu macaamilayo maaliyadda oo la jaanqaadaya heerarka caalamiga ah.

2. **Hindise-Sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga (Income Tax Bill)**

Hindise-Sharciyeedkaan waxa uu xoojinayaa awoodda dowladda ee ururinta dakhliga gudaha, isagoo hagaajnayaa nidaamka maamulka canshuuraha. Waxa uu muhiim yahay xasilloonida dhaqaalaha dalka iyo yareynta ku-tiirsanaanta gargaarka dibadda.

3. **Hindise-Sharciyeedka Shirkadaha Caymiska (Insurance Companies Bill)**

Xeerkan waxa uu dejiyay hab-raac dhammeystiran oo lagu nidaaminayo shirkadaha caymiska, isaga oo kor u qaaday kalsoonida maalgashiga. Waxa uu fursad u abuuray ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe in ay helaan adeegyo caymis oo la isku halayn karo.

4. **Wax-ka-beddelka Xeerka Ka-hortagga Lacag-dhaafka iyo Maalgelinta Argagixisada (AML/CFT Amendment Bill)**

Hindise-Sharciyeedka wax-ka-beddelkaan waxa uu adkeeyay shaqada dowladda ee la dagaallanka lacagaha sharci darrada ah iyo maalgelinta argagixisada. Waxa uu sare u qaaday awoodda hay'adaha maaliyadeed ee la socodka dhaq-dhaqaaqa maaliyadeed ee shakiga leh, si ay Soomaaliya ula jaanqaado heerarka caalamiga ah ee la xiriira hufnaanta maaliyadeed.

Ansixinta afartan xeer waxa ay u ahayd guul muhiim ah Golaha Shacabka BJFS, maadaama la rajeynaaya ineey xoojiyaan hannaanka Maareynta Maaliyadda Guud (PFM) ee dalka, isla markaana sare u qaadi doona kalsoonida caalamiga ah ee nidaamka maaliyadeed ee Soomaaliya. Waxa ay muujineysaa sida Baarlamaanku uga go'naa in uu hormuud u noqdo xoojinta hufnaanta dhaqaale, maamul wanaagga, iyo ilaalinta nidaamka maaliyadeed ee qaran.

## 5. Saamaynta Kormeerka/Korjoogtada Bulshada Rayidka

Joogitaanka korjoogtada bulshada rayidka intii uu socday kalfadhiga lixaad waxa uu door muuqda ka qaatay kor u qaadista daahfurnaanta iyo hagaajinta dhaqanka xildhibaanada Golaha Shacabka

BJFS. Ka hor inta aan la bilaabin kormeer joogto ah, fadhiyada Golaha Shacabka waxa badanaa lagu arkayay dooddo ka baxsan ajandaha rasmiga ah, iyadoo xildhibaanno soo bandhigayeen arrimo siyaasadeed oo aan khusayn Hindise-Sharciyeedyada laga doodaaya iyo ajandaha guud, ama isku dayayeen in ay carqaladeeyaan doodaha ku saabsan hindise-sharciyeedyada. Fadhiyo dhowr ah waxa ay ku dhammaadeen muran kulul oo aan la xiriirin mowduuca laga doodayay, halka marar kalena fadhiyo dhowr jeer u baaqdeen **kooram la'aan**, taas oo dib u dhigtay hawlihii sharci-dejinta. Markii la bilaabay kormeerka joogtada ah ee ay Jilayaasha Aan Dowliga Aheyn ee Xafiiska Bulshada Rayidka Soomaaliyeed fududeysay iyada oo loo marayay mashruuca GOLE-KAAB, sidaas darteed ejawiga golaha shacabka waxa uu si muuqata u noqday ama isku badalay mid xasilooni iyo maamuus badan leh, maadaama xildhibaanadu ogaadeen in la tabinaayo hab dhaqankood ama ay ku socoto qiimeyn.

Si kastaba ha ahaatee, korjoogtada bulshada rayidka waxa ay sidoo kale diiwaangeliyeen dhowr dhacdo oo muujinayay anshax-xumo halis ah oo ay ku kacayeen xildhibaanno ka tirsan Golaha Shacabka. Dhacdooyinkaas waxaa ka mid ahaa **gacan-ka-hadal** dhex maray qaar ka mid ah xildhibaanada, burburinta agabkii gudaha hoolka sida **makarafoonno la jebiyay**, iyo qalalaaso ay ay saameysay askarta amniga (Police). Falalkan waxay dhaawaceen sumcadda hay'adda sharci-dejinta waxayna abuureen walaac ku saabsan sida loo ilaalinayo qodobada anshaxa ee baarlamaanka ku qoran Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka. Ugu dambeyn, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa ku qasbanaaday inuu qaado tallaabooyin ciqaabeed oo dhan oo ay ku jireen mamnuucid ku meel gaar ah oo lag mamnuucay xildhibaanno gaar ah ka soo qaybgalka doodaha iyo fadhiyada ansixinta si loo soo celiyo nidaamka iyo kalsoonida geeddi-socodka sharci-dejinta.

Inkasta bulshada rayidka aanay helin fursad ay ku galaan kulamada guddiyada oo ah goobta ugu qotada dheer ee lagu falanqeeyo, laguna beddelo, laguna diyaariyo hindise-sharciyeedyada balse joogitaankooda joogtada ah ee fadhiyada guud waxa uu si weyn hoos ugu dhigay doodaha ka baxsan ajandaha, wuxuuna xaddiday isku dayada lagu siyaasadeeyo doodaha sharci-dejinta. Diiwaangelinta joogtada ah ee dabeecadda xildhibaanada ay sameeyeen bulshada rayidka waxa ay sare u qaadday wacyiga shacabka ee ku saabsan caqabadaha ku gadaaman habsami-u-socodka fadhiyada. Waqti badan kadib, korjoogtada waxey u muuqatay ineey gacan ka geysteen hagaajinta nidaamka doodaha, kordhinta diiradda fadhiyada, iyo dhisidda anshax sharci-dejin oo ka waxtar badan kii hore. Si kastaba ha ahaatee, horumar joogto ah ma imaan doono ilaa bulshada rayidka la siiyo marin ballaaran oo ay kaga qaybqaataan **kulamada guddiyada** golaha shacabka maaddaama halkaas ay ka dhacaan go'aanada ugu muhiimsan ee saameeya tayada sharciyada.

## 6. Waxqabadka iyo Soo-xaadiritaanka Xildhibaanada

Kooxda korjogtada bulshada rayidka ee Golaha Shacabka waxa ay muujiyeen walaac weyn oo ku saabsan joogteynta soo-xaadiritaanka xubnaha xildhibaanada intii uu socday kalfadhiga lixaad ee Golaha Shacabka. Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ay bulshada rayidka si isdaba-joog ah u xariiqeen waxa uu ahaa maqnaanshaha nidaamka **Hansard**, kaas oo muhiim u ahaa

diiwaangelinta joogtada ah ee hadallada, codbixinnada, ka-qaybgalka xildhibaannada doodaha, iyo sida ay uga doodeen shuruucda saddexda akhrin ee ay soo mareen. Iyada oo aan la helin nidaam casri ah oo lagu diiwaangeliyo waxqabadka xildhibaannada waa caqabad weyn, waxa suuragal noqon weyday in bulshada iyo hay'adaha kormeerka baarlamaanku ay si hufan u qiimeeyaan joogteynta soo-xaadiritaanka, hab-dhaqanka codbixinta, iyo sida uu xildhibaan walba ugu hawlanaa doodaha sharci-dejinta. Maqnaanshaha xogtan waxa uu si weyn u wiiqay daahfurnaanta, waxaana yaraatay isla-xisaabtanka xildhibaannada.

Marka la eego joogteynta soo-xaadiritaanka, waxqabadka Golaha Shacabka intii uu socday kalfadhiga 6aad waxa uu ahaa mid aad uga hooseeyay heerka laga filayay hay'ad sharci-dejineed oo ka kooban 275 xildhibaan. Inta badan fadhiyada guud waxa ka soo xaadiri jiray celcelis ahaan **140 illaa 160 xildhibaan**, taas oo ka dhigan in mar kasta ay maqnaayeen in ka badan **100 xildhibaan**. Hab-dhaqankan waxa uu si joogto ah uga jiray fadhiyada caadiga ah, halka fadhiyada aan caadiga ahayn (extraordinary sessions) ay ka sii yaraadeen ka-qaybgalka. Korjoogtada bulshada rayidka waxay sheegeen in soo-xaadiritaan la'aantaasi ay hoos u dhigtay tayada doodaha ayna dib u dhigtay hawlaha sharci-dejinta. Intii kalfadhigu socday, ugu yaraan **afar fadhi** ayaa baaqday kooram la'aan darteed, taas oo dhaawacday waxtarka shaqada baarlamaanka.

Dhinaca ka-qaybgalka doodaha, kormeerayaasha bulshada rayidka waxa ay diiwaangeliyeen in xildhibaanno badan aysan si firfircoon uga qayb qaadan doodaha ku saabsan hindise-sharciyeedyada, iyaga oo aan soo jeedin wax diidmo sharci ah, wax-ka-beddel, wax ku daris ama faallooyin qoto dheer oo ku saabsan qodobbada la horkeenay. Tani waxay abuurtay shakiga ah in xildhibaannada badankoodu aanay si dhammaystiran u akhrin, u falanqeyn, ama u fahmin hindise-sharciyeedyada ay u codeynayaan. Dhawr fadhi ayaa sidoo kale halis ugalay inuu gabi ahaanba istaago kulanka golaha shacabka muran siyaasadeed oo aan khusayn ajandaha, isku dayo lagu leexinayay doodaha rasmiga ah, iyo hannaan aan fiicneen oo aan la xiriirin qodobada laga doodayay. Dabeecadahani waxay khatar gelisay habsami-u-socodka golaha shacabka waxayna hoos u dhigtay kalsoonida lagu qabo nidaamka sharci-dejinta.

## 7. Dhacdooyinkii Adkaa ee ka Dhacay Kalfadhiga 6aad

Kalfadhiga 6aad ee Golaha Shacabka waxa uu ahaa mid ay ka dhaceen khalkhal siyaasadeed, buuq soo noqnoqday, iyo tallaabooyin anshax oo aan hore loogu arag kalfadhiyadii hore. Bulshada rayidka oo kaliya joogtay si ay u kormeeraan, oo aan wax door ah ku lahayn doodaha, ayaa fadhiyada ku arkay xaalado muujinaya nuglaansho iyo jahwareer hay'adeed oo ka jiray golaha.

Mid ka mid ah arrimaha ugu weyn ee xiisadda dhaliyay waxay ahayd kiiska **Xildhibaan Dr. Cabdullaahi Xaashi Aabiib (HOP#201)**. Waxaa lagu eedeeyay inuusan soo xaadirin fadhiyada waajibka ah, sida ku xusan **Qodobka 59(d)** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qodobka 8(4)** ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka, kuwaas oo oggolaanaya in xildhibaanka laga qaado xubinnimada haddii uu ka maqnaado laba fadhi oo xiriir ah oo aan cudurdaar lahayn. Go'aan ka soo baxay 15 March 2025 ayaa ku dhawaaqay in kursigiisu bannaan yahay, iyadoo la sugayo habraacyada

sharciga ah ee xiga. Dhanka kale, Dr. Cabdullaahi Xaashi Abiib wuxuu ka mid ahaa mucaaradkii ugu hadalka badnaa ee dowladda, isagoo si joogto ah qoraallo daba-gal ah oo lagu eedeeyay musuqmaasuq, maamul xumo, iyo ku takrifal mashruucyo ay wadaan Bangiga Adduunka ku baahin jiray boggiisa X/Twitter. Arrintan ayaa dhalisay shakiga in weerarka ka dhanka ah kursigiisa uu lahaa ujeeddo siyaasadeed.

**29 April 2025**, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa soo saaray warqad uu ku soo celinayo go'aankii Guddiga Anshaxa ee ku saabsanaa HOP#201, isaga oo ku eedeeyay guddiga inay ku xadgudbeen **Qodobada 4, 33, 50(2)(D) iyo 59** ee Xeer-hoosaadka. Maalin kadib, **30 April 2025**, Guddoomiyuhu wuxuu soo saaray warqad kale oo uu ku mamnuucayo qaar ka mid ah xildhibaannada, kuwaas oo lagu eedeeyay buuq, gacan-ka-hadal, carqalad gelin iyo jebinta xeer-hoosaadka intii lagu guda jiray doodaha kiiska Dr. Cabdullaahi Xaashi Abiib. Warqaddan waxa lagu xusay **Qodobada 14, 16, 18(a)(b), iyo 28** ee Xeer-hoosaadka Golaha.[3]

### A. Liiska Xildhibaannada Laga Mamnuucay Fadhiyada (29 & 30 April 2025)

Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa laba liis ku soo saaray xildhibaannadii laga mamnuucay ka qaybgalka fadhiyada guud, kulamada guddiyada, doodaha iyo codbixinta. Arrintan waxaa lagu sababeeyay "arrimo anshax iyo amni oo khuseeya."[4]

**Kooxda 1aad — 20 Xildhibaan oo laga mamnuucay fadhiyada:**

1. **Xil. Maxamed Deeq Barre Cumar (Fiyoore)**
2. **Xil. Sadaam Maxamuud Cabdi (Jubeer)**
3. **Xil. Daahir Amiin Jeesow**
4. **Xil. Xasan Cabdi Ismaaciil (Xasan Yare)**
5. **Xil. Cabdirisaaq Xasan Axmed (Dhookhir)**
6. **Xil. Maxamed Bashiir Cali (Baxnaan)**
7. **Xil. Axmed Maxamuud Jaamac (Buux)**
8. **Xil. Cali Maxamed Sheekh (Cali Bagadi)**

---

[3] Article 59 of the Somali Provisional Constitution is titled **Disqualification of Membership of the Federal Parliament**, and it deals with how a member can lose their seats.

[3] Qodobka 17aad (4) "Xil-waayidda Guddoomiyaha Golaha& Labadiisa Ku xigeen" waxey u qorneyd "Moshinka xil ka-qaadista waxaa laga doodayaa loona codeynayaa toban (10) cisho oo maalin shaqo ah Gudahood, laga bilaabo taariikhda moshinka la keeney Golaha". Waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4aad, kulanka 20aad ee 31/10/2018

[4] Qodobka 33aad (1) ee "Xeerarka Guud ee Gudiyada" waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4aad kulanka 21aad ee 3/11/2018. Qodobka 16aad faqrada 5(a) XH-GSH-B10 si warbahinta loo saaro waxaa soo jeedin ku soo gudbinaya xildhibaan kadibna Golaha ayaa u codeenaya. Goluhu wuxuu ansixiyey wax-ka-badelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Diseember 31, 2022. 41 Qodobka 16aad, faqrada 5(c) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Diseember 31, 2022. 42 Qodobka 16aad Faqrada 5 (d) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Diseember 31, 2022.

9. **Xil. Sadaq Cabdullaahi Cabdi**
10. **Xil. Maxamed Cabdiraxmaan Axmed (Xayle)**
11. **Xil. Mowliid Cabdi Maxamuud**
12. **Xil. Maxamed Cali Cumar (Caananuug)**
13. **Xil. Faysal Axmed Maxamuud (Wahaabi)**
14. **Xil. Cali Mahdi Maxamed (Qalato)**
15. **Xil. Xasan Cabdinur Cabdi**
16. **Xil. Cabdirashiid Jire Qalinle**
17. **Xil. Cabdiraxmaan Axmed Cusmaan (Gurey)**
18. **Xil. Cabdiraxmaan Isaaq Maxamed**
19. **Xil. Dr. Cabdirashiid Maxamed Nuur (Jilley)**
20. **Xil. Cabdirashiid Maxamed Xidig**

**Tiro 4 Xildhibaano lahna Xildhibaano laga mamnuucay:**

1. **Xil. Maxamed Cabdiqaadir Xaaji**
2. **Xil. Cumar Cali Cabdi Maxamed**
3. **Xil. Isaaq Maxamed Mursal**
4. **Xil. Maxamed Cismaan Cumar**

Xildhibaannadan ayaa lagu eedeeyay inay ka qayb qaateen buuq, gacan-ka-hadal, iyo falal loo arkay inay khatar galinayaan amniga gudaha ee Golaha Shacabka.

**B. Xildhibaannada Dib Loogu Fasaxay Ka-soo Qaybgalka – Warqadda Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad**

Maalmo ka dib, **Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka Mudane Xildhibaan Cabdullaahi Cumar Abshirow** ayaa soo saaray warqad uu ku tirtirayo mamnuucidii uu hore u soo saaray Guddoomiyaha. Warqaddan waxa lagu sheegay muhiimadda ay leedahay midnimada Golaha, cadaaladda hab-raaca iyo in shaqada Baarlamaanka aan hakad geli karin.

Guddoomiye Ku-xigeenku wuxuu dib u fasaxay dhammaan **24ka xildhibaan** ee labadii liis ku jiray:

1. Maxamed Deeq Barre Cumar (Fiyoore)
2. Sadaam Maxamuud Cabdi (Jubeer)

3. Daahir Amiin Jeesow
4. Xasan Cabdi Ismaaciil (Xasan Yare)
5. Cabdirisaaq Xasan Axmed (Dhookhir)
6. Maxamed Bashiir Cali (Baxnaan)
7. Axmed Maxamuud Jaamac (Buux)
8. Cali Maxamed Sheekh (Cali Bagadi)
9. Sadaq Cabdullaahi Cabdi
10. Maxamed Cabdiraxmaan Axmed (Xayle)
11. Mowliid Cabdi Maxamuud
12. Maxamed Cali Cumar (Caananuug)
13. Faysal Axmed Maxamuud (Wahaabi)
14. Cali Mahdi Maxamed (Qalato)
15. Xasan Cabdinur Cabdi
16. Cabdirashiid Jire Qalinle
17. Cabdiraxmaan Axmed Cusmaan (Gurey)
18. Cabdiraxmaan Isaaq Maxamed
19. Dr. Cabdirashiid Maxamed Nuur (Jilley)
20. Cabdirashiid Maxamed Xidig
21. Maxamed Cabdiqaadir Xaaji
22. Cumar Cali Cabdi Maxamed
23. Isaaq Maxamed Mursal
24. Maxamed Cismaan Cumar

## 8. Caqabadaha iyo Firaaqyada Lagu Arkay Kalfadhiga 6aad

Inkasta oo Kalfadhiga 6aad uu gaaray dhowr guul oo sharci-dejin ah, haddana waxa jiray caqabado dhanka nidaamka, maamulka gudaha, iyo habraaca ah oo si weyn u wiiqay tayada iyo hufnaanta shaqada Golaha Shacabka. Bulshada rayidka oo joogtay fadhiyada ayaa diiwaangelisay arrimo soo noqnoqday oo muujinayay tabar-darrada hay’adaha iyo khilaaf siyaasadeed oo gudaha ah.

Caqabadaha hoose ayaa soo koobaya dhibaatooyinkii ka muuqday fadhiyada caadiga ah, shaqada guddiyada, tallaabooyinka anshaxa iyo go'aamada hoggaanka Baarlamaanka.

1. **Maqnaanshaha Nidaamka Hansard iyo Diiwaangelin Daciif ah**

Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn waxa uu ahaa maqnaanshaha nidaamka Hansard oo ah diiwaan rasmi ah oo lagu qoro doodaha, codeynta, soo xaadiritaanka iyo ka-qaybgalka xildhibaannada. Iyadoo nidaamkaasi uusan jirin, waxay adkaatay in la fahmo waxqabadka xildhibaannada, la hubiyo go'aamada Golaha Shacabka, ama dadweynuhu la socdaan ka-qaybgalka wakiilladooda. Maqnaanshahan ayaa sidoo kale fududeeyay khilaafyo ku saabsan soo xaadiridda, sida kiiska Xildhibaan Dr. Cabdullaahi Xaashi Aabiib, isla markaana hoos u dhigay daahfurnaanta hay'adaha sharci-dejinta.

2. **Daahfurnaan La'aan iyo Xannibaad Ku Saabsan Gelitaanka Kulamada Guddiyada**

Inkasta oo bulshada rayidka loo oggolaaday inay ka soo qayb galaan fadhiyada guud, haddana gabi ahaanba waa laga mamnuucay kulamada guddiyada halkaas oo lagu sameeyo falanqaynta qodob-qodobka ah ee shuruucda. In ka badan 30 kulan oo guddiyadu yeesheen lagama soo saarin wax minits ah ama warbixin rasmi ah. Warbixinada keliya ee la faafiyay waxay ahaayeen qoraallo kooban oo bogga warbaahinta bulshada ee Facebook lagu faafiyay. Tani waxay ku xadgudubtay xaqa dastuuri ah ee helitaanka xogta, waxayna meesha ka saartay fahamka sida shuruucda loo qaabeeyo marxaladda ugu muhiimsan.

3. **Buuq Siyaasadeed iyo Jahwareer Ku Yimid Anshaxa Gudaha Golaha**

Kalfadhiga 6aad waxa ka dhacay buuq badan, dood ka baxsan ajandaha, qaylo, iyo mararka qaar gacan-ka-hadal. Fadhiyo badan ayaa dib loo dhigay sababo la xiriira habraacyo la jebiyay ama kooram la'aan. Arrimahan ayaa ugu dambeyn sababay in Guddoomiyaha uu soo saaro dhowr warqadood oo ciqaab ah, isagoo adeegsanaya **Qodobada 14, 16, 18(a)(b), iyo 28** ee Xeer-hoosaadka. Kuwa la ganaaxay waxay ahaayeen in ka badan **24 xildhibaan**, oo ay ku jiraan xildhibaannadii difaacayay Xildhibaan Dr. Cabdullaahi Xaashi Aabiib iyo afar wasiir oo xildhibaano ah oo lagu eedeeyay buuq iyo anshax-xumo. Tani waxay muujisay jilicsanaanta anshaxa Golaha Shacabka iyo in aan si isku mid ah loo dhaqan gelin Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.

4. **Jahwareer Ku Saabsan Fasiraadda Xeer-Hoosaadka (Standing Orders)**

Caqabad kale oo weyn waxay ahayd markii **Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad** Mudane. Cabdullahi Cumar Abshirow uu soo saaray warqad uu ku tirtirayo go'aannadii ganaaxa ee Guddoomiyaha Golaha Shacab BJFS Mudane. Aadan Maxamed Nur. Tani waxay muujisay fasiraado is khilaafsan oo ay hoggaanka labada dhinac ka bixinayeen Xeer-hoosaadka, taasoo dhaawacday midnimada hay'adda sharci-dejinta isla markaana abuurtay jahwareer ku saabsan sharciyadda habraacyada ciqaabta.

5. **Soo Xaadiritaanka iyo Kooram La'aan Soo Noqnoqotay**

Intii uu socday kalfadhiga 6aad, soo xaadiritaanka xildhibaannada aad buu u hooseeyay. Celcelis ahaan 140–160 xildhibaan oo kaliya ayaa ka soo xaadiri jiray fadhiyada guud ee 275-ka xubnood ka kooban yahay golaha shacabka. Fadhiyo badan ugu yaraan afar ayaa dib loo dhigay sababo la xiriira kooram la'aan. Soo xaadiritaanka hoose ayaa sidoo kale wiiqay tayada doodaha, gaar ahaan marka shuruucda akhrinta koowaad, labaad iyo saddexaad marayaan.

6. **Doodo Kooban oo aan Gaarin Heerka Sharci-dejin Qotodheer**

In kasta oo shuruuc badan la soo bandhigay, haddana tiro aad u yar oo xildhibaano ah ayaa bixiyay talooyin, wax-ka-beddel, ama falanqayn qodob-qodob ah. Doodaha intooda badan waxay isu beddeleen iska hor imaad siyaasadeed oo u dhexeeyay xildhibaanno mucaarad ah iyo kuwo taageersan dowladda. Tani waxay hoos u dhigtay falanqaynta dhabta ah ee sharciyada waxayna wiiqday tayada ugu dambeysa ee shuruucda la ansixiyay.

7. **La-tashi La'aan iyo Aragti Farsamo oo Ku Yaraan Shuruucda**

Marka laga reebo hal kulan oo talo-ururin ahaa oo dhacay 7 Maarso 2025 oo ku saabsanaa Hindise-Sharciyeedka Hay'adaha Maaliyadeed—oo ay bulshada rayidka iyo ganacsatadu ku qasbeen—Baarlamaanku ma uusan samayn wax la-tashi ah oo joogto ah. Shuruucda intooda badan waxaa diyaariyay wasaaradaha, kadibna waxaa ansixiyay Golaha Wasiirrada iyadoo aan lala tashan bulshada, aqoonyahannada ama daneeyayaasha kale. Tani waxay keentay in shuruucdu mararka qaar ka leexdaan duruufaha bulshada, dhaqanka iyo shuruudaha sharciga Islaamka.

8. **Daahfurnaan Guddiyada iyo Dib-u-dhac ku Yimid Shaqada Sharci-dejinta**

Guddiyada joogtada ahi waxay ku guuldareysteen soo saarista warbixinno faahfaahsan, minits rasmi ah, ama caddeyn ku saabsan wax-ka-beddellada ay ku sameeyeen shuruucda. Tani waxay sababtay dib-u-dhac ku yimid shuruuc muhiim ah oo lagu waday in lagu ansixiyo kalfadhiga 6aad, oo ay ku jiraan kuwii ka soo wareegay kalfadhigii 5aad, gaar ahaan shuruucda maamulka, dastuurka iyo siyaasadaha guud.

# 1. Talooyin

1. **In la abuuro nidaamka Hansard (Diiwaanka Rasmiga ah ee Doodaha):**

Golaha Shacabka BJFS waxa aad u habboonnaan laheed inuu sameeyo nidaam Hansard ah oo duuba wax kasta oo ka dhaca fadhiyada Golaha Shacabka, sida doodaha, codbixinta, iyo soo xaadiritaanka xildhibaannada. Diiwaankan waa in si guud loo heli karaa si shacabka, cilmi-baarayaasha iyo bulshada rayidka ay u ogaadaan sida xildhibaannadu u gutaan waajibaadkooda.

2. **In la xoojiyo daahfurnaanta kulamada guddiyada:**

Guddiyada waa inay soo saaraan qoraallo cad oo ku saabsan kulamadooda, oo ay ku jiraan soo xaadiritaanka, doodaha qodobada sharciga, wax-ka-beddellada la sameeyay, talooyinka la bixiyay, iyo go'aannada la gaaray. Sidoo kale, waa inay u oggolaadaan bulshada rayidka ka qaybgal habboon. Warbixinada guddiyada waa inay noqdaan kuwo hal qaab oo isku mid ah leh, si loo fahmo doodaha dhabta ah ee dhacay.

3. **In bulshada rayidka loo oggolaado ka qaybgalka kulamada guddiyada:**

Bulshada rayidka badanaa waa laga reebay kulamada guddiyada. Baarlamaanka waa inuu sameeyaa ama ku daraa xeer-hoosaadkooda ugu yaraan kaaso oggolaanaya in Bulshada Rayidka aqoonsiga leh inay ka soo qayb galaan kulamada guddiyada iyagoo ah korjoogteyaal ama ka qaybgalayaal soo jeedin kara talooyin, marka aanay jirin arrimo qarsoodi ama amni khuseeya. Wasaaraduhuna waa inay la tashiyada ka sameeyaan bulshada rayidka ka hor inta hindise-sharciyeedka u gudbin Golaha Shacabka BJFSs

4. **In la hagaajiyo nidaamka doodaha oo la adkeeyo anshaxa:**

Golaha Shacabka waa inuu si adag u dhaqan-geliyaa xeerarka joojinaya buuqa, qaska, doodaha aan ajandaha ku jirin, iyo anshax-xumada kale. Guddoomiyuhu waa inuu si caddaalad ah ugu adeegsadaa xeer-hoosaadka si doodaha u noqdaan kuwo nidaamsan oo sharaf leh. Falalka xun ee ka dhacay kalfadhiga 6aad waa inay keenaan tallaabo anshax oo cad oo la isku raacsan yahay.

5. **In la kordhiyo xirfadaha sharci-dejinta ee xildhibaannada:**

Xildhibaannada iyo shaqaalaha guddiyadu waxay u baahan yihiin tababarro gaar ah oo ku saabsan, falanqaynta, iyo hagaajinta hindise-sharciyeedyada. Golaha Shacabka waa inuu sameeyaa unug xafiis cilmi-baaris ah madax-bannaan oo siiya xildhibaannada macluumaad cad oo ku saabsan shuruucda ka hor inta aan la gaarin akhrinta labaad iyo tan saddexaad.

6. **In la hagaajiyo helitaanka xogta Baarlamaanka:**

Golaha Shacabka waa inuu casriyeeyaa mareegta rasmiga ah oo ku xiran nidaamka Hansard, taas oo u oggolaanaysa shacabka inay helaan diiwaanka doodaha, warbixinada guddiyada, hindise-sharciyeedyada horudhaca ah, minits-ka kulamada, doodaha xildhibaannada, liisaska soo xaadiritaanka, iyo muuqaallada fadhiyada. Sidoo kale waa in la dhisaa waax kayd ah oo nidaamisa dukumeentiyada digitaalka rasmiga ah.

7. **In la mideeyo oo la cadeeyo hannaanka anshax-marinta Xeer-Hoosaadka:**

Baarlamaanka wuxuu u baahan yahay habraac mideysan oo qeexaya sida loo ganaaxo, loo digo, ama dib loogu soo celiyo xildhibaannada. Kalfadhigii 6aad waxaa ka dhacay go'aanno is khilaafsan oo ka kala yimid Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka, taas oo muujisay baahida loo qabo habraac cad oo adag kuwas oo mideysan ka hortaga jahwareerka iyo ku takrifalka awoodaha anshax-marinta xildhibaanada baalmara hannaanka sharci-dejinta.

8. **In la waajibiyo la-tashiyada dadweynaha ee shuruucda muhiimka ah:**

Shuruucda muhiimka sida dib-u-habaynta dhaqaalaha, canshuuraha, iyo nidaamyada maaliyadeed waa inay maraan la-tashi dadweyne oo ay qayb ka yihiin bulshada rayidka, ganacsatada, aqoonyahannada iyo culimada, ka hor inta aan la geynin Baarlamaanka. Tani waxay xaqiijinaysaa in shuruucdu ka tarjumayaan baahiyaha bulshada iyo qiyamka Dastuurka.

9. **In la dhaqan-geliyo xeer-hoosaadka soo xaadiritaanka xildhibaannada:**

Golaha Shacabka waa inuu adeegsadaa nidaam casri ah oo lagu diiwaangeliyo soo xaadiritaanka xildhibaannada, laguna ganaaxo kuwa maqnaada iyaga oo aan lahayn cudurdaar sharci ah. Xogta soo xaadiritaanka iyo waxqabadkooda waa in la soo bandhigaa si bulshada loo siiyo awood ay kula xisaabtamaan

## 1. Gunaanad

Kalfadhiga 6aad ee Golaha Shacabka waxa uu gaaray natiijooyin sharci-dejin oo muhiim ah. Intii uu socday kalfadhigan, Baarlamaanka waxa uu ansixiyay Hindise-Sharciyeedyada Barakacayaasha (IDPs Bill), Hindise-Sharciyeedka Diiwaangelinta Rayidka iyo Tirakoobka Dadweynaha, iyo Afarta Hindise-Sharciyeed ee Dib-u-Habaynta Dhaqaalaha oo kala ahaa: Hindise-Sharciyeedka Hay'adaha Maaliyadeed (Financial Institutions Bill), Hindise-Sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga (Income Tax Bill), Hindise-Sharciyeedka Shirkadaha Caymiska (Insurance Companies Bill), iyo wax-ka-beddelka Hindise-Sharciyeedka Ka-Hortagga Lacag-dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada (AML/CFT Amendment Bill). Shuruucdan waxay muujiyeen in Baarlamaanku leeyahay awood sharci-dejineed oo wax ka beddeli karta maamulka dalka, nidaamka maaliyadeed, iyo tayada adeegyada bulshada, inkastoo weli ay jiraan farqi weyn oo ku saabsan ka-qaybgalka shacabka oo aad u yaraa muddadii kalfadhiga.

Dhanka kale, kormeer korjoogeyn joogto ah oo bulshada rayidka ahi sameysay waxa uu muujiyay tabar-darrada iyo caqabadaha saameeyay tayada iyo daahfurnaanta geeddi-socodka sharci-dejinta. Golaha Shacabka ma lahayn nidaam Hansard ah oo lagu diiwaangeliyo doodaha, codbixinta iyo ka-qaybgalka xildhibaannada. Sidoo kale, helitaanka kulamada guddiyada marka laga reebo fadhiyada Golaha Shacabka ayaa aad u xaddidnaa, taas oo meesha ka saartay fahamka dadweynaha ee ku saabsan sida go'aannada loo qaato. Soo-xaadiritaan hoose, buuq soo noqnoqday, iyo warbixin yar oo ka timaadda guddiyadu waxay si weyn u yareeysay kalsoonida shacabka ee Golaha Shacabka.

Khilaafka maamulka ee ka dhacay kalfadhigan ayaa sii adkeeyay caqabadaha jira. Warqado rasmi ah oo uu soo saaray Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS Mudane. Addan Maxamed Nuur ayaa muujiyay khilaafyo hab-raac, tallabooyin anshax, iyo xaalado ay xildhibaanno looga mamnuucay ka qeebgalka kulamada Golaha Shacabka oo mar dambe dib ugu soo celiyay Guddoomiye ku xigeenka 2-aad ee Golaha Shacabka BJFS Mudane. Cabdullahi Cumar Abshirow. Arimahan waxay caddeeyeen in aan si joogto ah oo isku mid ah loo dhaqan-gelin Xeer-hoosaadka, taasoo keentay

jahwareer iyo xiisad ka dhex dhalatay Golaha. Si kastaba ha ahaatee, Baarlamaanku waxa uu ku guulaystay inuu dhammaystiro ajandihii sharci-dejinta kalfadhigii 6aad.

Warsaxaafadeed ka soo baxay hoggaanka labada Aqal ee Baarlamaanka 21-kii Juun 2025 ayaa si rasmi ah u xaqiijiyay in Kalfadhiga 6aad uu xirmay 22-kii Juun 2025. Waxa sidoo kale lagu dhawaaqay in Kalfadhiga 7aad dib loo furi doono 22-ka Agoosto 2025, iyadoo la raacayo Qodobka 66(2) iyo Qodobka 74(2) ee Dastuurka KMG ah, Qodobka 23(1) ee Xeer-hoosaadka Aqalka Sare, iyo Qodobka 21(1) ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka. Hoggaanku waxa uu u mahadceliyay xildhibaannada labada Aqal sida sharafka leh ee ay u guteen waajibaadkooda intii uu socday kalfadhiga, waxana uu u rajeeyay inay fasaxooda ku soo dhammaystaan nabad iyo caafimaad.

Warsaxaafadeedku waxa uu sidoo kale ku boorriyay xildhibaannada in ay sii wataan shaqooyinkooda dastuuriga ah xilliga fasaxa, sida dabagalka shaqada guddiyadooda, la-xiriirka bulshada ay matalaan, iyo dib-u-eegista hindise-sharciyeedyada lagu falanqayn doono kalfadhiga 7aad. Tani waxa ay muujinaysaa muhiimadda ay leedahay in shaqada sharci-dejintu sii socoto xitaa marka aan la joogin fadhiyada guud ee Golaha Shacabka.

Gebogabadii, wax-ka-qabashada caqabadaha lagu arkay kalfadhigii 6aad waxay u baahan yihiin isbeddello hay’adeed oo xooggan, gaar ahaan nidaaminta diiwaangelinta rasmiga ah, daahfurnaanta shaqada guddiyada, iyo xoojinta nidaamka soo-xaadiritaanka iyo isbeddel dhaqan oo ku wajahan anshax, wadashaqeyn, iyo la-tashiga bulshada rayidka. Haddii talooyinka la soo jeediyay la hirgeliyo ka hor furitaanka Kalfadhiga 7aad ee Agoosto 2025, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu yeelan doonaa hannaan sharci-dejineed oo ka hufan, isla-xisaabtan xooggan, iyo ka-qaybgal bulsho oo ballaaran. Ugu dambayn, isbeddelladan waxay hubin doonaan in shuruucda uu ansixiyo Golaha Shacabka ay noqdaan kuwo waara, la fahmi karo, hufan, oo taageero ballaaran ka hela shacabka Soomaaliyeed.

i

---

[i] Warbixintan waxaa soo Ururiyey Kooxda Korjoogtada Bulshada Rayidka Kalfadhiga 6aad ee Golaha Shacabka BJFS, iyadoo ay fududeeysay Xafiiska Jilayaasha Aan Dowliga Ahayn ee Soomaaliyeed ee loo yaqaan (Somalia Non-State Actors – SONSA), iyadoo loo marayo Mashruuca **GOLE-KAAB** oo uu maalgeliyay Midowga Yurub (European Union).


Office Address:

Road @KM5, Safari apartment @KM5,

Hodan District

**Mogadishu - Somalia**

Tel: +252-612008723

Email: info@golekaab.so , info@sonsaplatform.org

Web: https://golekaab.so/ , https://sonsaplatform.org/

Social Platforms: SONSA, X, and LinkedIn:

https://x.com/SONSA_NSA , https://x.com/GoleKaab

https://www.facebook.com/SOSCENSA2016/

https://www.facebook.com/Golekaab/

https://www.linkedin.com/company/somali-non-state-actors/
https://www.linkedin.com/showcase/golekaab/



Special recognition is extended to **Hussein Mohamed Iyaye** for his role as Legal Contributor, ensuring that the report aligns with constitutional provisions and the Rules and Procedure of the House of the People.

Edited and reviewed with inputs from the Executive Director of the Somali Civil Society **Mr. Mohamed Aded Ali.**